# Cudurka Pneumococcal

## Waa maxay cudurka burukiitada?

Cudurka Pneumococcal waa caabuq ka dhasha bakteeriyada *Streptococcus pneumoniae*. Waa xanuun keena cudur iyo geeri badan, gaar ahaana ilmaha aad u yaryar, waayeelka aadka u duqoobay, dadka aan lahayn beeryarada ama aysan beeryaradu shaqaynayn, ama dadka difaacooda jirku liito. Waxaa jira in ka badan 90 noocyada kaladuwan ee bakteeriyada pneumococcal ah.

## Sidee ayuu cudurka pneumococcal ugu dhacaa dadka?

Bakteeriyada ayaa iskaga gudubta labada qof marka qofku qufaco, hindhiso ama uu u dhawaado qofka qaba caabuqa. Bakteeriyada ayaa ku jiri karta sanka iyo dhuunta ayadoo aan wax dhibaato ah gaysan laakiin mararka qaar waxey weerari kartaa sanbabada iyo marinnada dhiiga ayadoo sababaysa burukiito, septicaemia iyo meningitis.

Qof kasta ayaa khatar ugu jira qaadista cudurka Pneumococcal laakiin dadka waayeelka ah iyo ilmaha aadka u yaryar ayaa khatarta ugu badan ugu jira caabuqa. Si gaar ah waxaa khatar ugu jira dadka horey u xanuunsanaa, aan lahayn beeryarada ama nidaamkooda difaacu daciifay.

## Waa maxay astaamaha cudurka pneumococcal?

Bakteeriyada pneumococcal ayaa keeni karta caabuqyo ka farcama sida caabuqyada gudaha dhagaha, sanbabka ama caabuqa sanka.

Haddii bakteeriyada pneumococcal ay gasho jirka waxay sababtaa cuduro aad u xun, sida burukiitada (caabuqa sanbabada), meningitis (dhaawac gaara xididada ku xeeran maskaxda), septicaemia (sunta dhiiga) iyo osteomyelitis (caabuqa lafaha). Noocyadaan caabuqa ayaa loo yaqaanaa cudurka Pneumococcal ka farcama (IPD).

Cudurka Pneumococcal ka farcama (IPD) waa cudur aad u xun. Waa xanuun keena cudur iyo geeri badan, gaar ahaana ilmaha aad u yaryar, waayeelka aadka u duqoobay, dadka aan lahayn beeryarada ama aysan beeryaradu shaqaynayn, ama dadka difaacooda jirku liito. Waa sababta ugu wayn ee keenta burukiitada dadka ku dhacda.

Dadka uu ku dhaco caabuqu 1 kamid ah 4 qof ayay ku dhacaysaa burukiito, 1 kamid ah 4 qof ayuu ku dhacayaa meningitis, halka 1 kamid ah 10 kii qof na ay u dhimanayaan.

## Waa kuwee talaallada pneumococcal ee lagu talinaayo gudaha Ireland?

Muddo sanado ah Streptococcus pneumoniae ayaa noqday cudur aysan waxba ka tarayn daawooyin badan taasoo ka dhigtay daawaynta caabuqyada pneumococcal mid aad u dhib badan. Kahortaga cudurka ee loo adeegsado talaalka ayaa hadda ka muhiimsan xiliyadii hore oo dhan.

Waxaa jira labo talaallada pneumococcal oo kaladuwan oo ka hortaga caabuqyada pneumococcal.

Talaalka Pneumococcal conjugate (PCV13) kaasoo la siiyo dhammaan ilmaha yaryar asagoo qayb ka ah jadwalka caadiga ah ee talaallada carruurta. Talaalku wuxuu ka difaacaa ilmaha 13 nooc ee ugu badan ee cudurka pneumococcal.

Talaalka Pneumococcal polysaccharide (PPV23) kaasoo la siiyo dadka jira 65 sano iyo ka wayn iyo kuwa kawayn 2 sano ee qaba xanuunnada dabo dheeraaday.

## Yay tahay Inuu qaato Talaalka PCV13 Pneumococcal?

Cudurka Pneumococcal ayaa looga hortagi karaa talaal.

- Talaalka PCV ayaa la baxshaa asagoo qayb ka ah jadwalka rasmiga ah ee talaalka carruurta markay jirana 2, 6 iyo 13 bilood waxaana siiya dhakhaatiirta GP ga.
- Talaalka PCV ayaan i joogto ah loogu talinayn in la siiyo ilmaha jira 2 sano ama ka wayn ilaa inay khatar wayn ugu jiraan maahee caabuqa pneumococcal.

## Yay tahay Inuusan qaadan Talaalka PCV13 Pneumococcal?

Talaalka PCV ayaan si joogto ah loogu talinayn in loo siiyo carruurta ka wayn 2 sano jir.

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka PCV. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

## Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka PCV Pneumococcal?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa sharoobada ilmaha yar ee baristamoolka ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inaan cunugaagu aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood.

- 1 kamid ah 10 kii qof oo qaata talaalka ayaa dareemi doona xanuunka ama bararka meesha talaalka looga dhuftay ama waxaan qaban doonta qandho.
- Mataga, shubanka, oomateed xumada ayaa dhici kara.

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

## Sidee talaalka PCV u shaqeeyaa?

Talaalka PCV waxaa ku jira maadooyin lagasoo qaatay bakteeriyada **pneumococcal**. Talaalka ayaa shaqeeya asagoo u sahla nidaamka difaaca jirku inuu cudurka ka falceliyo bakteeriyada, asagoo uusan ilmuhu jiran.

## Waa sidee saamaynta talaalka PCV pneumococcal?

PCV waa talaal aad u waxtar badan wuxuuna kahortagaa ku dhawaad 80% bakteeriyada pneumococcal ee sababta IPD. Ilaa markii lagu daray PCV jadwalka talaalka joogtada ah ee carruurta waxaan marhorebaba aragnay hoos u dhac wayn oo ku jira dadka uu ku dhaco IPD.

## Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie